SOMALISKA

Kaalmada dadaalka ah ee iskuullku bixiyo

– MAXAA LAYGA RABAA INNAAN OGAADO HADDAAN AHAY WAALIDKA?

Skolverket

Waxaad tahay qof muhiim ah adigu

Adigu waxaad tahay qofka ilmahaaga ugu dhow. Sidaa daraadee waa muhiim inaad adiga iyo iksuulka ilmahaagu dhigtaa xiriir fiica leedihiin oo aad ka wada shaqaysaan horumarka ilmahaaga. Marka la adeegsado wada shaqaynta waxa kor u kacaya fursada uu ilmahaagu ku gaarayo haday noqoto dhinaca aqoont iyo arrimaha horumarka bulshadaba.

Haddaad taqaano shaqada am hawsha uu iskuulku qabto waxa kor u kacaya fursadahaaga aad gacan uga gaysan kartid waxbarashada iskuulka ilmahaaga. Waraaqahan waxaad ka helaysaa warbixin ku saabsan haddii ilmahaagu uu iskuulka uga baahan yahay caawimo ama waafajin dheeraad ah ama kaalmo khaas ah. Warbixintani waxay ku socotaa qofka ilmo u dhigtaan dugsiga u diyaargaroowga fasalka koowaad (förskoleklass), dugsiyada hoose/dhexe (grundskola), dugsiyada hoose/dhexe ee khaaska u ah ardayda naafada ah (grundsärskola), dugsiga gaarka ah ee ardayda caqliga dhiman (specialskola), iskuulka carruurta Samiga ah loogu talo galay (sameskola), dugsiyada sare (gymnasieskola), dugsiyada khaaska ah ee sare (gymnsieskola) ama dugsiyada wakhtiga firaaqada ah carruurta lagu hayo (fritidshem).

FAHANKA GUUD EE WAALIDKA IYO QOFKA ISKA LEH MAS'UULIYADA ILMAHA

Sida caadiga ah hal ama labada waalidba waxay leeyihiin mas'uuliyada hal ilmo. Qofka iska leh mas'uuliyada ilmaha ayaa ka mas'uul ah ilmaha isaga ayaana siinaya daryeelka uu ilmuhu u baahnaa, ammaanka iyo koriin wanaagsanba. Qofka ka mas'uul ah ilmo wuxuu guud ahaanba inta badan uu xaq u leeyahay inuu helo macluumaadka uu iskuulku hayo ee ilmahaas ku saabsan, xitaa waxyaabaha ilaalinta xogta sirta ah. Waalidka aan haysanin ama lahayn mas'uuliyada ilmahaas xaq uma laha inuu helo ama la siiyo macluumaadka xogta sirta ah ee ku saabsan ilmahaas.

XEERKA WAALIDKA IYO KA DADWEYNAHA IYO KA SHARCIGA SIRTA

Isku jid ayaa loo socdaa

Sharciga iskuulku iyo manhajkuba isku si ayay shuruud ugu xirayaan kuwa qabanqaabiya waxbarashada si ay ardayda oo dhami u helaan waxbarsho isku mid ah oo leh tayo fiican, meeshay doonaanba ha deganaadaan ama iskuulkay doonaanba ha dhigtaan. Mahajka waxa ku qeexan sharciyada aasaasiga ah, hadafka iyo shaqada guud. Hadaad akhrido waxaad ogaanaysaa waxyaabaha aad filayso iyo shuruudaha aad xaqa u leedahay in ilmahaaga la baro.

Qorshaha kooraskasta iyo qorshaha maadaduba waxay ku qeexan yihiin sababta maadadaa ama maadadaa qaybteedu ay ugu jirto iskuulka ee loogu daray. Halkaa waxa iyana ku jira marka maadada la dhigayo waxay maadadu ka kooban tahay. Kooras kasta qorshihiisa iyo qorshaha maada kasta waxa lagu soo gabogabeeyaa shuruuda aqoonta taas oo lagu qeexay inta ugu hoosaysa ee heerka aqoonta la aqbali karo iyo waxa loo baahan yahay markay noqoto talaabooyinka shahaadooyinka kala duwan.

Waxbarashada isku midka ah macnaheedu ma aha in waxbarashada loogu habeeyo/qaabeeyo ardayda oo dhan si isku mid ah ama dhaqaalaha iskuulka ardayda oo dhan isku si loogu qaybiyo. Iskuulku waa inuu tixgeliyaa shuruudaha kala duwanaanshaha iyo baahidaba. Siyaabo kala duwan ayaa hadafka lagu gaarikaraa.

Ardayda oo dhami waxay xaq u leeyihiin hogaamin, kaalmo iyo in lagu xiisegeliyo iskuulka si ay sida ugu macquulsan ugu gaaraan meelsare iyagoo ka ambaqaadaya xaaladahooda. Iskuulku wuxuu si khaas ah uga mas'uulyahay ardayda sababo awgeed ah ay ku adagtahay inay gaaraan shuruudaha aqoonta (kunskapskraven). Sidaa daraadeed waxbarashada weligeed looma jaangooynkaro ardayda oo dhan si isku mid ah. Arday badan ayaa intay iskuulka dhiganayaan u baahan mar uun kaalmo. Ardayda qaarkood waxay kaalmo u baahan yihiin wakhti gaaban halka ay qaarkale u baahan yihiin kaalmo wakhti dheer, ilaa iyo intay iskuulka dhiganayaan oo dhan. Maamulaha ayaa ka mas'uul ah qaababka kala duwan ee kaalmada iskuulka.

Noocyada kala duwan ee kaalmada

Iskuulka ayaa marwalba ka mas'uula qorshaha iyo fulinta waxbarashada. Xitaa waxay sidoo kale khuseeysaa dadaalka taageerada ah ee iskuulka ka jira, taas oo ah iswaafajinta dheeraadka ah (extra anpassningar) iyo kaalamad gaarka ah.

ISWAAFAJINAHA DHEERAADKA AH (EXTRA ANPASSNINGAR)

Haddii macalinku ama shaqaalaha kale ee iskuulku ay dareemaan inuu hal arday ku jiro khatar in aanu gaaraynin shuruudiihii loogu tallo galay inuu aqoonta ka gaaro (kunskapskraven) waxa haboon in la baadho sababta. Haddii loo arko in loo baahan yahay in wabarashada loogu sameeyo ardayga iswaafajin dheeraad ah ama siduu ula qabsan lahaa (extra anpassningar) marka si toos ah ayaa iswaafajintaa dheeraadka ah loo samaynayaa.

Iswaafajinta dheeraadka ah (extra anpassningar) waxa ka mid ah tusaale ahaan in ardayga la siiyo tilmaan cad ama in loo sharaxo kelmed, fikred ama uu helo hogaamin

fiican inta aanay bilaabin cutub cusub oo waxbarsho ah. Waxay kaloo xitaa noqonkartaa inuu ardaygu tababar dheeraad ah ku sameeyo akhriska, xisaabta, habka wax loo barto (studieteknik) ama dabaashaba. Inuu kaloo helo wax la soo duubay oo la shagaysto ama qalabka wax caawiya ee dhigitaalka ah waxay ka mid yihiin iswaafajinta dheeraadka ah (extra anpassningar) sidoo kale inuu macalin khaas ahi ardayga muddo gaabah caawiyo. Iswaafajintaa dheeraadka ah (extra anpassningar) waxa lagu qorayaa qorshaha horumarka shakhsiga qoraalada (skriftliga individuella utvecklingsplanen).

KAALMADA GAARKA AH

Haddii ardayga uu ku jiro khatar ama halis in aanu gaaranin shuruuridihii aqoonta looga baahnaa inuu gaaro (kunskapskraven) waloow loo sameeyey iswaafajintii dheeraadka ahayd (extra anpassningar) wuxuu markaa iskuulku u baahan yahay inuu baaritaan sameeyo haddii ay jirto baahi ku saabsan taageero ama kaalmo gaar ah. Inta badan baaritaanka waxa sameeya macalinka iyo shaqaalaha kuwa caafimaadka ardayda.

Baaritaanku wuxuu ka kooban yahay daraasad la sameeyo oo ku saabsan xaaladaha iskuulka ee ardayga iyo baaritaan sugan oo ah baahida ardayga oo ku wajahan kaalmo dheeraad ah. Aad ayay muhiim u tahay inay iskuulku daryeelaan ilaaliyaan ilmahaaga iyo fekredahaagaba. Baaritaanada qaarkood si fudud oo dhakhso badan ayaa loo sameeyaa, laakiin marmar waxa loo baahan yahay baaritaan ballaaran in la sameeyo. Marwalba tan ugu wanaagasani waxa weeye in wadashaqayn lala sameeyo mas'uulka ilmaha, laakiin iskuulku wuxuu samaynkaraa baaritaanka dhinaca wabarashada ku saabsan xitaa haddii aanu mas'uulka ilmuhu doonaynin.

Kaalmada gaarka ah waxa ardayga la siin karaa wakhti dheer waxaanay noqonkartaa kaalmo ballaaran. Tusaale ahaan kaalmada gaarka ahi waxay noqokartaa macalin khaas ah oo ardayga caawiya mudo dheer, waxbarasho koox khaas ah ama inuu ardaygu helo qof isaga la socda oo maalintii inta badan caawiya.

Kaalmada gaarka ah waxa lagu caddaynayaa barnaamijka tallaabo ka qaadida ah (ett åtgärdsprogram)

Haddii baaritaanku uu tuso inuu ardaygu u baahan yahay kaalmo gaar ah wuxuu iskuuku ka shaqaynayaa sidii uu u samayn lahaa waxa la yiraahdo barnaamijka tallaabo ka qaadida ah (ett åtgärdsprogram).[1] Wuxuu kaloo baaritaanku tusikaraa in aanu ardaygu u baahnayn kaalmo gaar ah markaa waa in uu maamulaha iskuulku go'aan ka gaaro in aan la samaynin barnaaminka tallaabo ka qaadida ah (åtgärdsprogram).

Barnaaminka tallaabo ka qaadidu (åtgärdsprogrammet) waa hab shaqo iyo qorshe kuwaas oo ah tallaabooyinka uu iskuulku ku fekerayo inuu fuliyo. Barnaaminka tallaabo ka qaadida ahi (åtgärdsprogrammet) waxa xitaa jirta isagoo warbixin ah wakhtiga la qiimaynayo. Qiimayntu waxa weeye in la eego sida ay bal tallaadaa la gaaday ay u shaqaysay. Iskuujlku wuxuu ardayga u sameeyaa barnaaminka tallaabo ka qaadida (åtgärdsprogram) intay doonaanba maadooyinka ha ahaadeen, qaybaha maadooyinka ama koorsooyinka loogu tallo galay kaalmada gaarka ah. Adiga iyo ilmahaagaba waxa laydiin soo bandhigayaa fursad sidaad uga qayb qaadan lahaydeen inaad fekerkiina keentaan marka la qorayo barnaaminka tallaabo ka qaadida (åtgärdsprogram) iyo qiimayntaba.

Sida looga dacwoodu go'aan

Qofka iska leh mas'uuliyada ilmaha iyo ardayda da'doodu ka wayn tahay 16 sannadood waxay xaq u leeyhiin inay ka dacwoodaan go'aan ku saabsan barnaamijka tallaabo ka qaadida (åtgärdsprogram) oo ay u dacwoodaan guddida Nidaamka dacwada iskuulada

[1] 3 cutubka. 8 iyo 9 §§ ee sharciga iskuulka 2010:800.

(Skolväsendet). Xitaa waxa macquul ah in laga dacwoodo haddii aanu iskuulku ka shaqaynin in la sameeyo barnaamijka tallaabo ka qaadida (åtgärdsprogram). Xitaa waxa iyana macquul ah in laga dacwoodo waxyaabaha uu ka kooban yahay barnaamijka tallaabo ka qaadida ah (åtgärdsprogram).

Dacwada waa inay ku qoran tahay go'aanka la rabo in laga dacwoodo iyo sababta looga dacwoonayo. Haddii ilmuhu leeyahay laba qof oo mas'uul ah labaduba waa inay ku qornaadaan dacwada si dacwadu u ansaxdo.

Dacwada waxa loo dirayaa iskuulka muddo sadex asbuuc gudaheeda ah kadib marka ay ardayga iyo qofka mas'uulka ahiba helaan go'aanka. Waxay markaa noqonaysaa inuu iskuulku bedelo go'aankiisii ama uu ku adgaysto. Haddii uu iskuulku doorto inuu ku adkaysto go'aankiisa wuxuu markaa dacwada u gudbinayaa guddida Nidaamka dacwada iskuulada (Skolväsendet). Warbixin dheeraad ah waxa laga helayaa bogga internetka ee www.overklagandenamnden.se.

Ma rabta inaad akhrido intaa in ka badan?

Sharciga iskuulka (2010:800) iyo kan Hay'adda iskuulada *tallooyinka guud ee iswaafajinta dheeraadka ah, kaalmada khaaska ah iyo barnaamijka tallaabo ka qaadida* waxaad ka soo dejinaysaa bogga internetka ee Hay'adda iskuulada www.skolverket.se.

Originalets titel: Stödinsatser i skolan

Grafisk produktion: Typisk Form designbyrå
Illustrationer: Tobias Flygar

Skolverket 2015

Skolverket